SSUP
Somali Social Unity Party

# Dastuurka

## Xisbiga Midnimada Bulshada Somaliyeed

*Amended & adopted by*
*the 2nd conference of the SSUP*
*28-29 June, 2008*

**we can achieve our goals**

**AS JOINTLY**

**WADAJIR**

**waan ku gaari karnaa himiladena**

## Horudhac

Bismilaahi, Raxmaani, Raxiimi. waxaanu halkan ku cadeyneynaa in dokumentigan uu yahayan nuqulkii labaad dastuurka xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed oo u baahan ansixin, kasoo uu si sharciyan ah dib-u-qaabeyn & dib-u-qoris ugu sameeyay Inj. Ahmed M Moalin-waharey oo ka mida gudiga fulinta xisbiga ee qaranka 20kii juun 2008. Dastuurka xisbiga SSUP waxaa uu waafaqsan yahay diinta islaamka lagumana dabaqi karo qodobo ka horimanaayo diinta hadii laga helo qodobo wax u dhimi kara diinta islaamka waa in golaha shirweynihu dib u waafajiyo. Dastuurka waxa uu ku qoranyahay afafka ingriisiga & somaaliga waxaana suurtagal ah in lagu turjumo afaf kale kadib marka la ansixiyo.

Sida la rajeynayo, dokumentigan waxaa loogu gudbin doona xubnaha xisbiga hadii ay suurta gasho ka hor inta aan la qaban shirweynaha la filayo in la qabto si ay degenaasho ugu aqristaan. Sidoo kale, dokumentiga waxaa loo qeybin doonaa kasoo qeybgalayaasha shirweynaha labaad sanadka si ay uga doodadan uguna daraan fakirkooda wax ku oolka ah. Gababadiina waxaa si wada jira u wada ansixin doona xubnaha gudiga dolaha dhexe iyo dhamaan xubnaha si xisbiga ee so xaadira shirka, si xisbiga SSUP u helo dastuur ansaxsan oo ku hawlgalo.

Gebagabadii, waxaan halkan mahadcelin uga soo jeedinayaa dhamaan xubnaha xisbiga taageeradooda niyadeeed meel kasta oo ay joogaan. Si gaar ah, waxaan ugu mahadcelinaya xubnaha sida joogtada ah ugu hurey xisbiga waqtigooga, awoodooda & fikradahooda xambaarsan qiimaha & cilmibarista bulsho. Sidoo kale waxaa jeclaan lahaa in aan dhiirigeliyo lan socod siiyo inta danaynaysa inay ku soo biiraan xisbiga mideynta bulshada Somaaliyeed "in aanu nahay xisbiga ay bulshada somaaliyeed raadinaysay" waana hubaal in wada jir lagu gaari karo himalada aanu higsanayno.

Yours sincerely,

____________________

Yassin Mahi Mallin
The Chairman of the Somali Social Unity

# QAYBTA KOWAAD

## TILMAAMAHA & XUBINIMADA XISBIGA

### QODOBKA 1 AAD.

### MAGACA XISBIGA

1. Xisbiga midnimada bulshsda Somaaliyeed waa xisbi siyaasi ah.
2. Magaca xisbigu waa; "Xisbiga Midnimada Bulshada Soomaaliyeed" marka lasoo gaabiyo waa XMBS ama SSUP
3. Xafiisya xisbiga ee maamul goboleedyada, gobolada & degmooyinka waxa ay qaadanayaan magaca xisbiga dambe kaga daraya magaca maamulgoboleedkooda, gobolkooda, ama degmadooda sida; "Xafiiska Xisbiga Midnimada Bulshada Soomaaliyeed ee ( magaca maamul goboleedka, gobolka, degmada ama laanta)

### QODOBKA 2 AAD.

### CALANKA & ASTAANTA XISBIGA

1. Calanka xisbigu midnimada bulshada soomaaliyeed qaab ahaan waa laydi, midabkiisana cadaan dhexdana ay kaga taalo astaanta xisbiga oo muuqaalkeeda la arki karo.
2. Astaanta xisbiga midnimada bulshada Soomaaliyeed waa ubax guduudan oo wareeg ah laguna wareejiyay magaca xisbiga oo ku qoran midab madow, halka hoosana looga qorey magaca xisbiga oo lasoo gaabiyay oo madow ah "SSUP"

### QODOBKA 3 AAD.

### XARUNTA XISBIGA

1. Xarunta xisbiga waa Muqdisho caasimada Soomaaliya.
2. Shanta sano ee ugu horeysa waxaa si ku meel gaar ah xarun u noqonaysa magaalada Katrineholm ee dalka Iswiishan.
3. Shirweynaha xisbiga, Golaha dhexe & golaha fulinta ee xisbiga ayaa si guud u siyaadin kara waqtiga ku meel gaarka, waxyna u bedeli karaan xarunta xisbiga gobolada degan ee Soomaaliya ama wadamada deriska ah hadii caasimada & gobolada dalku aysan nabad ahayn.
4. Xisbiga waxa uu xarumo ka furayaa Somaaliya shan qaybood oo kala ah " Qeybta waqooyi-galbeed, waqooyi-bari, bartamaha, koonfurta & koonfur-galbeed" qeyb waliba waxa ay:-

    4.1 Waxa ay mataleysaa gobollo federaal noqday ama gobol somaaliyeed.

4.2 Waxa ay ilaalinaysaa shuruucda & nidaam dawladeedka ka jirta goboladooda, gobolkooda & degmooyinkoda.

4.3 Waxa ay yeelanaysaa Gudi gobol sida ku qeexan qodobka 15 aad tirsigiisa 2.1 ee dastuurka.

4.4 Waxa ay yeelanaysaa Gudiyo degmo sida ku cad qodobka 15aad tirsigiisa 3.1 ee dastuurka xisbiga.

**5.** Xisbigu waxaa uu furaya xafiisyo laamo dibadeed oo loogu talagalay qurbojooga somaaliyeed ee ka tirsan xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed.

## QODOBKA 4 AAD.

## UJEEDOOYNKA XISBIGA

**1.** Siyaasada xisbigu waxa ay ku salaysantahay "Mideynta bulshada Somaaliyeed", iyadoo la adeegsanayo mabda'a dimoqraadiga ah ee ku dhisan sinaanta, cadaalada, wadatashiga, wada go'aanminta, ilaalinta xuquuda & xoriyada.

**2.** Xisbigu wuxu weligiis u shaqeynayaa bulshada Somaaliyeed meel kasta ay joogaan, isgoon ka horimaanayn caqiidada diintooda islaamka ah.

**3.** Xisbiga waa xisbi somaaliyeed, waxaa xuquuqdiisa leh xubnihiisa, waxaa lagu maamulaa/ lagu dhaqayaa dastuurkiisa.

**4.** Xisbiga waxa uu ixtiraamayaa soona dhaweynayaa nidaamyada ogol in la baahiyo awoodaha dawlada & maamulka guud ilaa heer dawlad-dhexe, heer gobol & heer degmo.

## QODOBKA 5AAD.
## DHAQAALAHA XISBIGA

**1.** Xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed waxaa dhaaqle u ah:-

1.1 Lacagta isdiiwaan gelinta xubinimada xisbiga

1.2 Lacagta qaaraanka xubinimada xisbiga

1.3 Taakuleynta uu ka helo jaaliyadaha dibada

1.4 Taakuleynta uu ka helo ganacsatada, ururada, hay'adaha & dowladaha dunida

1.5 Taakuleynta ay dowladu dhaqaale ahaan si siman u siiso axsaabta siyaasada.

**2.** Dhamaan dhaqaalaha ama hantida kusoo xeroota nidaamkaas waa hantida xisbiga lagamana dhigan karo hanti si gaar ah loo leeyahay.

## ARTICLE 6AAD.

## XUBINIMADDA XISBIGA

**1.** Ka mid noqoshada xisbiga waxa ay u furantahay qof kasta oo muwaadin Somaali ah ama asalkiisu Somaali yahay oo:-

1.1 Dadiisu gaartey 17 sano sida waafaqsan nidaamka dorashooyinka Somaaliya.

1.2 Ku nool Somaaliya ama dalalka dibeda

1.3 Aaminsan mabada'a Xisbiga midnimada Somaaliya.

1.4 Diyaar u ah inuu ka qaybqaato fulinta barnaamijka xisbiga.

1.5 Diyaar u ah inuu bixiyo qaaranka xubinnimada xisbiga oo ah 5 US$ sanadkii.

1.6 Oo aan xubin ka ahayn ama taageero u ahayn xisbi kale oo siysaasi ah oo ka jira dalka Somaaliya.

## QODOBKA 7 AAD.

## NIDAAMKA ISDIIWAANGELINTA

**1.** Dhamaan codsayaasha xubinimadda xisbiga ee soo buuxiyay shuruudaha qodobka 5aad shanaad, ayaa loo ogolyahay in ay dalbadaan foomka codsgia xubinimadda kana dalbadaan xarunta xisbiga ee ku taal degmadiisa, laanta xisbiga ee jaaliyadiisa ama waxa uu kasoo rogan karaa shabakada xisbiga oo ah www.ssup.se mana jireyso wax kala sooc ah oo lagula kacayo codsadaha nooc kasta uu yahay.

**2.** Codasade kastaa waa inuu si haboon oo dhamaysiran u buuxiyo foomka codsiga xubinimadda soona raacsho taariikh nololeedkiisa CV, labo sawir iyo cadeyn banki/xawaalad oo cadeynaysa inuu bixiyay lacagta qaaraanka xubinnimada ee sanad walba ku waajibta xubnaha xisbiga.

**3.** Codsade kasta foomka codsigiisa xubinimo & dokumentigiisa ee waafaqsan qodobka 6aad tirsigiisa 2aad ee dastuurka waa inuu u diraa xafiiska xisbiga ee degmadiisa ama laantiisa.

**4.** Xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed waxa uu si gaar ah oo taxadarleh u eegayaa codsadayaasha naafada ah, wuxuu sinayaa caawinaad ku haboon naafo kasta.

## QODOBKA 8 AAD.

## AQBALAADA XUBINIMADA XISBIGA

**1.** Dhamaan codsiyada ka midnoqoshada xisbiga waxaa ogolaanaya ama diidi kara golaha degmada ee uu codsaduhu codsigiisa u gudbiyay uuna degenyahay.

**2.** Codsade kastaa waxaa uu jawaabta gudiga degmada e ku saabsan codsigiisa helayaa mudo ka yar sedex asbuuc.

## QODOBKA 9 AAD.

## SHURUUCDA XUBNAHA XISBIGA

**1.** Qofkasta oo xubin ka ah xisbiga waxa uu xubin buuxda ka yahay hal degmo oo ah degmadiisa uu ka diiwaan geshan yahay uuna deganyahay.

**2.** Xubinimadda xisbigu waxay ku salaysantahay sanadle *(waxaa laga wada xubin kasta xubinimadeedu waa mid sanadla ah oo cusbooneysiinteedu ku xirantahay bixinta qaaraanka xisbiga)*

**1.** Xubin kasta oo xisbiga ka mid ah waxa uu/ay cusboonaysiinaysaa xubinimada ugu danbeyn 31 nofeembar sanad kasta, xubinimda waxay sii buuxda u jireysaa ilaa 31ka nofembar sandka xiga.

**3.** Xubin kasta oo xisbiga ka tirsan oo aan cusbooneysiisan xubinimada xisbiga ka hor dhamaadka sanadka labaad, waa inuu marlabaad codsadaa foomka codsiga xubinimada xisbiga si la mid ah sida codsadayaasha cusub oo kale.

4. Xubin kasta oo ka mida xisbiga oo qaaraan bixin la'aan owgeed in ka badan sedex jeer dib isu diiwaangelisa waxa ku adkaanaysa inay isu soo sharaxdo kuraasta xubnaha degmada, gobolka & golayaasha qaranka waxaana mudnaanta ka yeelanaya xubnaha sida joogtada ah u guta waajibaadkooda dastuuriga ah.

5. Hadii ugu yaraan shan xubnood oo ka tirsan xisbiga ay xubin ka mida xisbiga kusoo eedeeyaan inuu ku dhaqmay kala sooc/eex ama qabiilaysi tasoo si hoose u kala qeybinaysa xubnaha xisbiga waxaa uu si toos u wayayaa xubinimada xisbaga.

## QODOBKA 10 AAD.

## WARBIXINADA & QAARANKA XISBIGA

2. Xubin kasta oo ka mida waxay bixinaysa lacagta qaaraanka xubinimada xisbiga, waxayna siinaysaa xafiiska degmada ama xafiiska laanta jaaliyada xisbiga ee uu deganyahay ugu dambeyn 31st Nofeembar sanad kasta.

3. Xafiis degmeed kasta ee xisbiga waa inay diraan 70% lacagta qaaraanka xubinimada xisbiga kuna lifaaqaan warbixinta xubnaha degmada una diraan xafiiska gobolka ee xisbiga. 30% harey waxa ay noqonayaan qarishiyaadka xafiiska degmada, isticmaalka qarashka degmada waa in lagu cadeeyo dokumentiga warbixinta degmada ee loo gudbinayo xafiiska gobolka ee xisbiga.

4. Xafiis goboleed kasta ee xisbiga waa inuu diraa 40% lacagta qaaraanka guud ee xubinimada xisbiga ee gobolka kuna lifaaqo warbixinta xubnaha xisbiga ee gobolka, 60% harey waxa ay kala noqonayaan 30% qarashiyaadka xafiisyada degmooyinka u harey & 30% ah kharsh xafiiska gobolka ee xisbiga, waa inay ku soo cadeeyaan isticmaalkeeda dokumentiga warbixinta gobolka ee loo gudbinayo xarunta dhexe ee xisbiga.

5. Xafiis degmeed & xafiis laameed kasta oo aan u dirin xafiiska gobolka lacagaha & warbixinada qaaraanka xubinimada xisbiga waqtiga loogu tala galay, waxa waayi karaan xuquuqaha ay ku leeyihiin xafiiska gobolka.

## QODOBKA 11 AAD.

## XUQUUQDA XUBNTA XISBIGA

1. Xubin kasta oo ka mid ah xisbiga si joogta ahana u bixisa qaraanka xubinimada xisbiga waxay/ waxuu xaq ugu leeyahay xisbiga: -

    1.1 Inuu helo warqada aqoonsiga xubinimo ee xisbiga.

    1.2 Inuu ka qaygalo xubin ahaan shirarka xisbiga ee degmooyinka & gobolada.

    1.3 Inuu cod ka bixiyo ama laga doorto degamada uu ka diiwaangashan yahay:

    1.4 In loo magacaabo jagooyinka gudiyada xisbiga sida waafaqsan dastuurka & sharci hoosaadyada xisbiga.

    1.5 Inuu wakiil ahaan uga qeybgalo shirarka xisbiga ee heer qaran, hadii ay usoo magacowda degmada ama laanta jaaliyada uu ka tirsan yahay.

    1.6 In loo gudbiyo lana socod siiyo siyaasada & waxqabadka xisbiga.

    1.7 Inuu u soo jeediyo talooyin dhamaan xarumaha xisbiga.

## QODOBKA 12 AAD.

## WAAJIBAADKA XUBINTA XISBIGA

**1.** Xubin kasta oo xisbiga ka mida waa inay/inuu gudataa waajibaadkan: -

1.1 Inuu ixtiraamo oo ilaaliyo sharafa & karaamada Xisbiga.

1.2 Inuu ixtiraamo oo uu raaco dasuurka xisbiga.

1.3 Inuu si firfircoon uga qeybqaato fulinta barnaamijka xisbiga.

1.4 Inuu taageero go'aamada ay gaaraan dhamaan gudiyada xisbiga.

1.5 Inuu bixiyo lacagta qaraanka xubinimada xisbiga ee sanadlaha ah.

1.6 Inuu u gudbiyo maba'adiida xisbiga dadka Somaaliyeed ee aan xisbiga ku jirin.

## Qodobka 13 AAD.

## TAGEERAYAASHA XISBIGA

**1.** Xisbigu waxa uu yeelanayaa tageerayaal si shaqsi ahaan ama koox ahaan u taageersan oo ah muwadiniin somaliyeed ama ajnabi/shisheeye oo degan dalka gudihiisa ama dibediisa.

# QEYBTII LABAAD

## QAAB DHISMEEDKA XISBIGA & WAAJIBAADKOODA

## QODOBKA 14 AAD.

## QAAB DHISMEEDKA XISBIGA

**1.** Shiweynaha qaranka ee xisbiga

1.1 Golaha dhexe xisbiga ee qaranka

1.2 Gudiga fulinta xisbiga ee golaha dhexe qaranka

1.3 Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

1.4 Gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

1.5 Gudiga sharciga & anshax dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka.

**2.** Shirweynaha gobolka ee xisbiga

2.1 Golaha gobolka ee xisbiga

2.2 Gudiga fulinta gobolka ee xisbiga

2.3 Gudiga hanti dhowrka gobolka ee xisbiga

2.4 Gudiga doorashooyinka gobolka ee xisbiga

2.5 Gudiga sharciga & anshax dhowrka gobolka ee xisbiga

**3.** Shirweynaha degmada ee xisbiga

3.1 Gudiga degmada ee xisbiga.

3.2 Gudiga fulita degmada ee xisbiga.

3.3 Gudiga hanti dhowrka degmada ee xisbiga

3.4 Gudiga doorashooyinka degmada ee xisbiga

3.5 Gudiga sharciga & anshax dhowrka degmada ee xisbiga

**3.** Shirweynaha jaaliyadaha ee xisbiga

1.1 Gudiga jaaliyadaha ee xisbiga.

1.2 Gudiga fulita jaaliyadaha ee xisbiga.

1.3 Gudiga hanti dhowrka jaaliyadaha ee xisbiga

1.4 Gudiga doorashooyinka jaaliyadaha ee xisbiga

1.5 Gudiga sharciga & anshax dhowrka jaaliyadaha ee xisbiga

## ARTICLE 15

## QEYBAHA GOLAHA DHEXE EE ISBIGA

**1.** Golaha dhexe ee xisbiga waxaa uu ka kaaban yahay:-

1.1 Gudoomiyaha Xisbiga

1.2 Labo Gudoomiye ku Xigeen

1.3 Gudoomiyayaasha gudiyada gobolada ee xisbiga

1.4 Gudoomiyaha Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

1.5 Gudoomiyaha Gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

1.6 Gudoomiyaha Gudiga shariciga & anshax dhowrka xisbiga ee qaranka

1.7 Xoghayah guud ee xisbiga

1.8 Xoghayayaasha Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka

## QODOBKA 16 AAD.
## QEYBAHA GUDIGA FULINTA XISBIGA EE QARANKA

**1.** Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waxaa uu ka kooban yahay:-

1.1 Gudoomiye

1.2 Gudoomiye ku xigeenka kowaad

1.3 Gudoomiye ku xigeenka labaad

1.4 Xoghaye guud

1.5 Xoghayaha maaliyada

1.6 Xoghayaha waxbarashada & horumarinta bulshada

1.7 Xoghayaha caafimaadka & Bii'ada

1.8 Xoghaya warfaafinta & isboortiga

1.9 Xoghayaha dhaqanka & dib-ujaheynta siyaasada

1.10 Xogahaya xiriirka gudaha & arimaha haweenka

1.11 Xoghayaha xiriirka caalamka & xiriirinta jaaliyadaha

## QODOBKA 17 AAD.

## WAAJIBAADKA XUBNAHA GUDIGA FULINTA XISBIGA EE QARANKA

**1.** Masuuliyada gudoomiyaha gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waa:-

(a). Gudoomiyaha gudiga fulinta xisbiga qaranka waa madaxa ugu sareeya xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waxaana soo dooranaya shirwenaha qaran ee xisbiga.

(b). Gudoomiyaha waxa uu gudoonshaa golaha dhexe xisbiga ee qaranka & golaha fulinta xisbiga ee qaranka.

(c). Gudoomiyaha waxa waajib ku ah inuu hogaamiyo oo uu hago dhamaan howlaha xisbiga isagoo tixraac ka qaadanaya golaha dhexe & glaha fulinta xisbiga ee qaranka.

(d). Gudoomiyaha waxa uu u idman yahay inuu matalo xisbiga una saxiixo heshiisyada dibeda isagoo matalaya magaca xisbiga.

(e). Gudoomiyaha waxa masuul ka yahay qorista & dhimista shaqaalaha caadiga ah ee u shaqeeya golaha dhexe & gudiga fulinta xisbiga ee qaranka.

(f). Gudoomiyaha waxa masuul ka yahay hantida guud ee xisbiga.

(g). Gudoomiyaha waxa uu leeyayah dhamaan masuuliyadaha kale ee ku xeer hosaadyada xisbiga ee ay sameeyeen shirweynaha qaran & golaha dhexe xisbiga ee qaranka.

**2.** Masuuliyada labada Gudoomiye ku xigeen

(a). Gudoomiye ku xigeenada gudiga fulinta xisbiga qaranka waa ku xigeenada madaxa ugu sareeya xisbiga midnimada bulshada Somaaliyeed, waxa ay noqon karaan lab ama dhedig, waxaana soo dooranaya shirwenaha qaran ee xisbiga.

(b). Gudoomiye ku xigeenada gudiga fulinta xisbiga qaranka waxa ay awood u leeyihiin inay gudoonshaan golaha dhexe & gudiga fulinta xisbiga ee qaranka marka uusan soo xaadirin gudoomiyaha.

(c). Gudoomiye ku xigeenada gudiga fulinta xisbiga qaranka waxa ay leeyihiin dhamaan masluyidaha uu siinayo xeer hoosaadka xisbiga ee ay sameeyeen shirweynaha qaran & golaha dhexe xisbiga ee qaranka.

(d). Gudoomiye ku xigeenka kowaad waxaa u masuul kayahay:-

- Inuu iskuduwo oo uu diyaariyo ajendayaasha shirweynaha qaran, golaha dhexe & golaha fulinta xisbiga ee qaranka.
- Inuu qaabeeyo iskuna xiro howlaha galaha dhexe, gudiga fulinta, gudiga hantid howrka, gudiga doorashooyinka & gudiga sharciga & anshax dhowrka xisbiga ee qaranka.
- Inuu matalo xisbiga una saxiixo heshiisyada gudaha & kuwa dibeda hadii loo baahdo isagoo ku saxiixaya magaca xisbiga.
- Inuu bedelo jagada gudoomiyaha hadii gudoomiyihu xanuunsado, dhinto ama dembi ku cadaado maxkamad xukunto, waxaa uu xilka

gudoomiyenimo sii haynayaa ilaa laga gaarayo xiliga dooshada lagan doorto gudoomiye kale.

(e). Gudoomiye ku xigeenka labaad waxaa u masuul kayahay:-

- Inuu kormeero howlaha ay fulinayaan gudiga fulinta xisbiga ee qaranka, gudiyada gobolada & degmooyinka ee xisbiga.
- Inuu qaabeeyo iskuna xiro howlaha golaha dhexe xisbiga, gudiyada gobolada & gudiyada degmooyinka.
- Inuu matalo xisbiga una saxiixo heshiisyada gudaha & kuwa dibeda hadii loo baahdo isagoo ku saxiixaya magaca xisbiga.

**3.** Masuuliyada Xoghayaha Guud ee Xisbiga

(a). Xoghayaha guud ee xisbiga waa xoghaya guud ee golaha dhexe xisbiga & gudiga fulinta xisbiga ee qaranka, waxa uu noqon karaa lab amam dhedig, waana inuu ka mid yahay xubnaha golaha dhexe xisbiga ee lagu doortey shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Masuuliyada xoghayah guud ee xisbiga waxay tahay: -

- Inuu diyaariyo agendaha gudiga fulinta xisbiga ee qaranka
- Inuu xafido dokumentiyada xisbiga kuna xafido meel dhowrsan.
- Inuu la socdo dokumentiyada, waraaqaha & wareegtooyinka ka baxaya xisbiga heer qaran
- Inuu qoraal ka reebo dhamaan kulamada golaha dhexe & gudiga fulinta xisbiga ee qaranka.
- Inuu saxiixo waraaqaha isku xirka gudaha xisbiga isagoo ku saxiixaya darajadiisa/ darajadeeda xoghaye guud.

**4.** Masuuliyada Xoghayaha Dhaqaalaha

(a). Xogahayaha dhaqaalaha xisbiga waa madaxa misaaniyada xisbiga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waxaan soo dooranaya shrweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xogahayaha dhaqaalaha xisbiga waxa uu masuul ka yahay:-

- Inuu maamulo dhamaan howlaha misaaniyada xisbiga.
- Inuu qabto howlaha misaaniyada logu doonayo xisbiga
- Inuu shaqaaleysto khibradlayaal dhaqaalo yahano ah hadi loo baahdo.
- Inuu qeybiyo misaaniyada xisbiga si waafaqsan shuruucda misaaniyada xisbiga.

(c). Inuu saxiixo howlaha miisaaniyada xisbiga isagoo ku saxiixayo darajadiisa xoghayanimo.

**5.** Masuuliyada Xoghayaha Waxbarashada & Horumarinta Bulshada

(a). Xoghayah waxbarashada & horumarinta bulshada ee xsibiga waa masuulka barnaamijyada horumarinta bulshada & waxbarashada ee xisbiga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waa inuu xubin ka yahay golaha dhexe xisbiga ee qaranka oo ay soo doorteen shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xoghayah waxbarashada & horumarinta bulshada ee xsibiga waxa uu masuul ka yahay:-

- Inuu xiriir wanaagsan & wada shaqeyn la sameeyo hay'adaha & maamulada dawliga ah ee ku howlan horumarinta bulshada & waxbarashada ee ka howl gala dalka.
- Inuu sare u qaado tayada aqooneed ee xubnaha xisbiga.
- Inuu diyaariyo qaababka loo qabanayo barnaamijyada wacyigelinta bulshada ee xisbiga heer qaran, gobol, degmo & jaliyadeed.
- Inuu qabto barnaamjyo doodo wacyigelin, shirar wacyigeln & aqoon isweydaarsiyo dhexmara aqoonyahanka, ardeyda, dhalinyarada & ururada haweenka.
- Inuu u raadiyo waxbarasho dibadeed ardeyda danyarta ah ee tabaaleysan.

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha horumarinta bulshada & waxbarashada isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo.

**6.** Masuuliyada Xoghayaha Caafimaadka & Bii'ada ee Xisbiga

(a). Xoghayah caafimaadka & bii'ada ee xisbiga waa madaxa barnaamijyada caafimaadka & bii'ada ee xisbiga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waana inuu ka mid yahay golaha dhexe ee xisbiga eelagu soo doortay shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xoghayah caafimaadka & bii'ada ee xisbiga waxaa uu masuul ka yahay: -

- Inuu xiriir wanaagsan & wada shaqeyn la sameeyo hay'adaha iyo maamulada dawliga ah ee ku howlan horumarinta caafimaadka & bii'ada ee ka howlgala somaaliya.
- Inuu diyaariyo barnaamijyo tayadooda kor u qaadaya maamulada dowliga & kuwa aan dawliga ahyn ee ku howlan horumarinta caafimaadka & bii'ada somaaliya.
- Inuu ka qeybqaato sameynta qorshe qaranka ee caafimaadka & bii'ada.

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha horumarinta caafimaadka & bii'ada isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo.

**7.** Masuuliyada Xoghayaha warfaafinta & Isboortiga ee Xisbiga

(a). Xoghaya warfaafinta iyo isboortiga ee xisbiga waa masuulka howlaha warfaafinta & isboortiga ee xisbga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waana inuu ka mid yahay golaha dhexe ee xisbiga eelagu soo doortay shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xoghaya warfaafinta iyo isboortiga ee xisbiga waxa uu masuul ka ayahay:-

- Inuu faafiyo & qeybiyana go'aanada ay soo saaraan golaha dhexe & gudiga fulinta xisbiga & shirweynaha qaran ee xisbiga.
- Inuu dyaariyo uuna qabto shirar jaraa'id ee xisbiga
- Inuu ilaaliyohowlaha daabacaada xisbiga.
- Inuu taageero isboorti siiyo dhalinta xisbiga

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha warfaafinta & isboortiga isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo

**8.** Masuuliyada Xoghayaha Dhaqanka & Dib-u-jiheynta siyaasada

(a). Xogahaya dhaqanka dib-u-jiheynta siyasada e xisbiga waa masuulka barnaamijyada dhaqanka & borobogaandada ee xisbiga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waana inuu ka mid yahay golaha dhexe ee xisbiga eelagu soo doortay shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xogahaya dhaqanka dib-u-jiheynta siyasada e xisbiga waxa uu masuul ka yahay: -

- Inuu diyaariyo oo u daabaco sawirada borobogaandada siyaasada.
- Inuu dib ugu jiheeyo bulshada wadada dimocraadiyada.
- Inuu xoojiyo dhaqanka bulshada lana shaqeeyo madaxda dhaqanka.

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha dhaqanka & dib-u-jiheynta isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo.

**9.** Masuuliyada Xoghayaha Xiriirka Gudaha & Arrimaha Haweenka ee Xisbiga

(a). Xoghayaha xiriirka gudaha & arrimaha haweenka waa masuulka barnaamijyada haweenka & xiriirinta gudaha ee xisiga, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waana inuu ka mid yahay golaha dhexe ee xisbiga eelagu soo doortay shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xoghayaha xiriirka gudaha & arrimaha haweenka waxa uu masuul ka yahay: -

- Inuu isku xiro xiriirka arrimaha gudaha xisbiga
- Inuu dhiiri geliyo oo uu xoojiyo haweenka xisbiga ka midka ah.

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha xiriirka gudaha & arimaha haweenka isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo

**10.** Masuuliyada Xoghayaha Xiriirka Caalamiga & Jaaliyadaha

(a). Xoghayah xiriirka caalamiga & jaaliyadaha ee xisbiga waa madaxa barnaamijyada xiriirka caalamiga & jaaliyadaha, waxa uu noqon karaa lab ama dhedig, waana inuu ka mid yahay golaha dhexe ee xisbiga eelagu soo doortay shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Xoghayah xiriirka caalamiga & jaaliyadaha ee xisbiga waxa uu masuul ka yahay: -

- Inuu matalo siyaasada & danaha xisbiga ee dibeda.
- Inuu kormeero iskuna xiro laamaha jaaliyada ee xisbiga.
- Inuu xiriir wanaagsan & wada shaqeyn la sameeyo bulshada caalamka, hay'adaha caalamka & wadaada deriska.

(c). Inuu saxiixo dhamaan howlaha xiriirka dibeda & jaaliyadaha isagoo ku saxiixaya darajadiisa xoghayenimo

## QODOBKA 18 AAD.

## WAAJIBAADKA QEYBAHA XISBIGA

**1. Shirweynaha qaran ee xisbiga**

(a). Shirweynaha qaran ee xisbiga waa awooda ugu sareysa.

(b). Shirweynaha qaran ee xisbiga waxa uu ka kooban yahay 175 ergo oo ka kala imanaya xafiisyada gobolada, degmooyinka iyo jaaliyadaha ee xisbiga.

(c). Shirweynaha qaran ee xisbiga waxa uu qabanaya howlahan: -

- Doorashada afhayeenka shirweynaha qaran iyo ku xigeenkiisa
- Doorashada xubnaha golaha dhexe xisbiga ee qaranka
- Doorashada gudoomiya xisbiga
- Doorashada gudoomiye ku xigeenada xisbiga
- Doorashada xubnaha golaha hanti dhorka xisbiga ee qaranka
- Doorashada xubnaha golaha doorashooyinka xisbiga ee qaranka
- Dooarshada xubnaha golaha sharciga & anshax ilaalinta xisbiga ee qaranka
- Ansixinta & wax ka bedelka sharuucda dastuurka xisbiga
- Dejinta & ansixinta siyaasada & xeer hoosaadyada xisbiga
- Urrurinta & xoojinta go'aamada kasoo baxa shiweynayasha kale ee xisbiga

1.1 Golaha dhexe xisbiga ee qaranka

(a). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waa hogaanka sare ee maamulka howlaha xisbiga waxuuna ku maamulayaa si waa faqsan barnaamijka xisbiga, dastuurka iyo xeer hosaadyada xisbiga.

(b). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxa uu ka kooban yahay 33 xubnood, kow iyo toban ka midah ay tahay gudiga fulinta xisbiga ee golaha dhexe qaranka, kuwaas oo lagu soo doortay shirweynaha qaranka.

(c). Mudada uu jirayo Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waa shan sano laga bilaabo maalinta la doortay, laman dheeraysn karo waqtiga, laakiin dib waa loo dooran karaa xubnaha ku jra golaha dhexe ee xisbiga iyagoo si sharci ah u soo maraya nidaamka doorashoyinka xisbiga.

(d). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waa awooda ugu sareysa ee go'aamisa howlaha xisibiga marka uusan jirin kalfadhiga shirweynaha xisbiga. *(waxaa laga wadaa inta u dhexeysa labada kalfadhi ee shirweynaha xisbiga)*

(e). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxaa uu qorsheeyaa misaaniyada & barnaamij howleedka sanadka xiga ee xisbiga.

(f). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxa uu kala qeexaa xuquuqaha & sharciyada ay masuuliyad ahaan kala leeyihiin gudiyada fulinta xisbiga ee heer qaran, heer gobol, heer degmo & heer jaaliyadeed.

(g). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxa uu kulmayaa labo jeer sanad kasta.

(h). Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxa uu yeelan kara kalfadhi aan caadi ahayn, waxaa isugu yeeri kara gudoomiyaha golaha dhexe markii uu ka codsi ka helo

gudoomiyaha golaha fulinta ama sedex meelood meel xubnaha golaha dhexe xisbiga ee qarana.

(i). Go'aamada kulamada Golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxay ansax noqon karaan marka ay soo xaadiraan tiro ka badan kalabar tirada xubnaha golaha dhexe xisbiga ee qaranka.

1.2 Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka

(a). Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waxaa uu ka kooban yahay kow iyo toban xubnood oo laga soo dhex magacabey golaha dhexe ee xisbiga marka laga reebo gudoomiya & labada gudoomiye ku xigeen oo iyaga si gaar ah ay u soo doorteen shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Mudada uu jirayo gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waa shan sano laga soo bilaabo maalinta la doortey laman dheereysiin karo mudadaas.

(c). Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waxaa waajib ku ah inuu hubiyo in la fuliyay go'aamadi ay sameyeen shirweynaha qaran ee xisbiga & golaha dhexe xisbiga ee qaranka.

(d). Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waxaa waajib ku ah inuu hubiyo in si xafidan keydka dokumentiga xisbiga loogu xafiday meel ku haboon.

(e). Gudiga fulinta xisbiga ee qaranka waxaa uu masuul ka yahay shaqaalaha ka shaqeeya xafiisyada xisbiga.

1.3 Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

(a). Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waxa uu ka kooban yahay sedex hanti dhowre & sedex ku xigeen oo ay soo doorteen shirweynaha qaran ee xisbiga.

(b). Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waxay dhexdooda ka doorannayan gudoomiye, kaasoo gudoominaya una gudbinaya waxqabadkooda gudiga fulinta xisbigaee qaranka, golaha dhexe xisbiga ee qranka iyo shirweynaha qaran ee xisbiga.

(c). Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka awood u leeyahay inuu dabagal hanti dhowr ku sameeyo hawlaha xisbigu fuliyo, gudiga fulinta xisbiga ee qaranka & arrimaha dhaqaalaha ee xisbiga.

(d). Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka wax ay soo bandhigayaan qoraal muujinaya xisaabaadka hawlaha ay qabteen sanadkii la soo dhaafey dhamaan gudiyada fulinta xisbiga ee heer qaran, gobol, degmo & jaaliyadeed waxayna u bandhigayaan kulan sanadeedka shirweynaha qaran ee xisbiga.

(e). Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waxay soo bandhigayaan qoraal muujinaya xisaabaadka hawlaha ay qabteen sanadkii la soo dhaafey golaha dhexe xisbiga ee qaranka waxayna u bandhigayaan kulan sanadeedka shirweynaha qaran ee xisbiga.

(f). Mudada uu jirayo Gudiga hanti dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waa shan sano laga soo bilaabo maalinta la doortey laman dheereysiin karo mudadaas.

1.4 Gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka

(a). Shirweynaha qaran ee xisbiga ayaa dhisaya gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka , gudigaas oo noqonaya mid ka madax banaan awoodaha gudiyada & golayaasha xisbiga, si ay u qabtaan doorashooyin qaran si xaq ah oo xor ah u dhaca.

(b). Gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waxa uu ka kooban yahay shan xubnood oo aqoon uleh shuruucda xisbga, dalka & kuw caalamiga ah, dhexdoodana waxay ka dooranayaan gudoomiye gudoonsha gudigooda.

(c). Gudiga doorashooyinka xisbiga ee golaha dhexe qaranka waxaa waajib ku ah inay diyaariyaan oo ay maamulaan nidaamka doorashooyinka xisbiga ee qaranka, waxayna xaq u leeyihiin inay u ogoladaan ama ka joojiyaan musharaxiinta parlamaanka ee laga soo doortay gobolada & degmooyinka si waafaqsan barnaamijka & dastuurka xisbiga.

1.6 Gudiga sharciga & anshax dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka.

(a). Shirweynaha qaran ee xisbiga ayaa dhisaya gudiga sharciga & anshax dhowrka xisbiga ee golaha dhexe qaranka , gudigaas oo noqonaya mid ka madax banaan awoodaha gudiyada & golayaasha xisbiga, si uu u ilaaliyo dastuurka & sharafta xisbiga.

